

Fahanka Warbixinta Ardaygaaga

Gobalka Maine ayadoo la Adeegsanaayo Buundada Cabirka Imtaxaanka Sanadka

Jaantusyada midabka leh, ee jiifa ee ku qoran bogaga 1 iyo 2 ee warbixinta ardaygaaga ayaa muujinaaya buundada heerka ardaygaaga. Buundadaan ayaa cabiraysa dedaalka ardaygaaga ee ku aadan imtaxaankaan ayadoo laga eegaayo xirfadaha muhiimka ah ee akhriska iyo xisaabta ee heerka fasalkiisa marka loo eego Heerarka Buundada Guud ee Gobalka.

Imtaxaanka akhriska ee fasalka 4-aad wuxuu cabiraa xirfadaha sida:

- Soo-koobidda qodobada muhiimka ah ee sheekooyinka, ciyaaraha, gabay-yada, iyo qoraalka xogta.
- Adeegsiga faahfaahinta iyo tusaaleyaasha qoraallada marka la sharxaayo waxa qoraalladu sheegayaan.
- Samaynta isku xirka ayadoo la adeegsanaayo cadeynta ku jirta qoraalka.
- Aqoonsiga fariinta ama casharka laga baranaayo sheekada, ciyaarta, ama gabayga ayadoo la adeegsanaayo faahfaahinta guud.
- Isku eegista iyo isbarbar dhigista sheekooyinka ay qoreen qoraayaasha kaladuwan ama kala matalaaya dhaqannada kala duwan.

Imtaxaanka xisaabta ee fasalka 4-aad wuxuu cabiraa xirfadaha sida:

- Isku dhufashada iyo isku qaybinta tirooyinka godadka badan.
- Fahanka jajabka siman.
- Isku daridda iyo kala jaridda jajabyada leh hooseeyaha isku mid leh.
- Ku dhufashada jajabyada tiro guud.
- Ku kala soocida qaababka sifooyinkooda.

Buundooyinka Aaga Casharka

Buundooyinka Aaga Casharka oo ku qoran bogga 2 ee Warbixinta Gaarka ah ee Ardayda ee ardaygaaga ayaa kuu sahlaaya inaad aragto dhinacyada uu awooda u leeyahay iyo meelaha uu ardaygaagu u baahan yahay inuu hormar ka sameeyo maadadaas. Ma aha wadarta guud ee buundada maadada oo dhan.

Tusaale, haddii ardaygaagu uu buundada ugu sarayso ka haysto Qoraalka Aqoonta Luuqada, aagaas ayaa noqonaaya meel uu heer sare ka gaaray. Haddii buundada Qoraalka Warbixinta uu hooseeyo, taas ayaa noqonaysa aag uu ku liito.

Fadlan la xiriir macalinka ardaygaaga si aad xog dheeri ah uga hesho sida aad u taageeri karto waxbarashada ardaygaaga ee Aagagaan Casharka.